



Mulkiilahu Gurigeeyga Ayuu Iga Xirtay

-
- ❖ Akhri tan haddii aad ku nooshahay Gobolka Washington oo keliya.
 - ❖ Waxaad ka heli kartaa dhammaan xaashiyaha warka xaqiiqda ah ay ku yaalaan halkan WashingtonLawHelp.org.
-

- ❖ **Shuruucda guri ka saarista iyo sida maxkamadaha ay wax uga qabtaan dhibaataada COVID-19** waxey isu bedeli kartaa si dhaqso ah waana kala duwanaan kartaa iyadoo ay ku xiran tahay meesha aad ku nooshahay. Hel macluumaadkii ugu dambeeyay oo wax ka baro caawimada guriga saarida aaggaaga halkan WashingtonLawHelp.org.
-

Tan ma inaan akhriyaa?

Akhri tan haddii aad kireysato abartmentka ama guriga aad ku nooshahay, oo mulkiilahaagu beddelay qufullada si aadan u soo gelin guriga, isagoo qorshehaagu ahayn in aad guurto. **Waa in aad sidoo kale heshaa talo sharci isla markaaba.** Hoos ka eeg habkii aad ula xiriiri lahayd.

Maxaan baran doonaa?

- ✓ Haddii iyo goorta mulkiilahaagu uu marnaba kaa xiran karo guriga aad kirada ugu jirto
- ✓ Waxaad sameyn lahayd haddii mulkiiluhu guriga kaa xirto
- ✓ Meesha laga helo caawimo

Mulkiilahaygu sharciyan ma iga xiran karaa guriga?

Waxay dhici kartaa oo keliya haddii ay u muuqato in aad joojisay kirada inaad bixiso oo aad guurtay adigoo u sheegin mulkiilaha (taas oo loo yaqaan "**dayacaada**")

meesha aad kirada ugu jirtay), **ama** booliiska ayaa fuliyay amar maxkamadeed (oo loo yaqaan **Xukun Maxkamadeed oo Guriga iga Saaraya**) si uu guriga kaaga saaro.

Mulkiiluhu ma beddeli karo qifulka, kumana dari karo qiful kale, oo si kale kaagama horjoogsan karo in aad gasho guriga. Kaama uu saari karo xitaa haddi aad dib uga dhacday bixinta kirada, korontada, gaaska. kulayliyaha, biyaha, ama khidmadaha kale.

-
- ❖ Wac xoghayaha maxkamadda sare ee degmadaada. Hubso in mulkiiluhu uusan xareyn dacwad guri ka saarida adiga kugu saabsan. Haddii mulkiiluhu sidaas sameeyay, oo aad aaminsan tahay inuu mulkiiluhu ku siinin waraaqaha dacwadda ee maxkamada ka socda, isla markiiba raadso caawimaad sharci.
-

Haddii mulkiiluhu guriga kaa xirto, waxaad la tiigsan kartaa maxkamada. Haddii aad muujiso in xirashadu ay sharci darro aheyd, maxkamaddu waa in ay ku amartaa mulkiilaha in uu lacag ku siiyo. Sideen ugu dacweeyaa maxkamadda dacwadaha lacagta qiimaheedu hooseeyo? ([How do I Sue in Small Claims Court?](#)) way ku caawin kartaa, waxayna ku xirantahay inta lacagta aad ku dacwiyaysaa tahay.

-
- ❖ **Kama xereyn kartid** dacwad maxkamada kaysaska lacagta qiimaheedu hooseeyo si aad u hesho amar maxkamadeed oo kuu ogolaanaya in aad dib ugu laabatid gurigaaga. Arag qareen.
-

Mulkiilahaygu miyuu iga xiri karaa korantada, gaaska, kulayliyaha iyo biyaha?

Wuxuu kaa xiri karaa oo keliya marka dayactir la sameynayo. Mulkiiluhu **kaama xiran karo** korantada, gaaska, kulayliya iyo biyaha sababtoo ah waxaad la daahday kirada ama uu doonayo in uu guriga kaa saaro.

-
- ❖ Haddii adeegyadu ku qoran yahiin magaca mulkiilaha, waa sharci darro inuu mulkiiluhu joojiyo bixinta biilasha si adeegga lagaaga jaro. Akhri Mulkiilahaygu Wuxuu Iga Jartay Korantada, Gaaska, Kulayliyaha iyo Biyaha! ([My Landlord Shut Off My Utilities!](#))
-

Haddii milkiiluhu kaa xirto korantada, gaaska, kulayliyaha iyo biyaha, waxaad la tiigsan kartaa maxkamadda. Garsooruhu wuxuu kugu abaalmarin karaa \$100 maalin kasta oo aadan haysan koranto, gaas, kulayliye iyo biyaha.

Mulkiilahu wuxuu xereeyay dacwad guri ka saarida waxaanu helay xukun maxkamadeed oo guriga iga saaraya. Mana heli karo waqti waxyaabaha aan u baahnaa oo dhan aan ku soo qaato intaan la gaadhin waqtiga ku qoran xukunka maxkamada.

Mulkiilahu isaga oo uu kormaeerayo booliisku alabtaada banaanka wuu u saari karaa hadaadan joogin. Muddo aan ka badnayn saddex maalmood ka dib marka uu helo xukun maxkamadeed oo uu guriga kaaga saaro, waxaad mulkiilaha qoraal ku weydiisan kartaa in uu ku kaydiyo alaabtaada. Markaa mulkiilahaagu waa in uu kaydiyo dhammaantood. Mulkiiluhu sidoo kale waa in uu keydiyaa alaabtaada haduu ogyahay inaad tahay qof naafo ah oo aan awoodin in uu weydiisato milkiilaha in uu alaabta u keydiyo.

❖ Guud ahaan waa in aad adigu bixisaa kharashka qaadista iyo keydinta si aad hantidaada u soo ceshato.

Haddii aad diido in lagu kaydiyo, milkiiluhu **ma** keydin karo alaabtaada. Mulkiiluhu badanaa wuxuu kuu dhigi karaa alaabtaada wadada lagu lugeeyo ama barta gaariga la dhigto.

Intii aan maqnaa, mulkiilahaygii ayaa qaatay alaabtaydii. limana soo celinayo. Maxaan samayn karaa?

Warqad u qor mulkiilaha. Warqadaada ku qor (haddii ay run tahay) in aadan dayacin guriga iyo (haddii ay run tahay) oo uu qorshahaagu yahay in aad ku sii noolaato halkaas. Hayso nuqulka warqadaas oo xafido. Waxaad isticmaali kartaa warqada tusaalaha ah ee hoos ku taala.

Hubso in aad caddeyn karto mulkiilahu in uu warqadan helay. Keenso markhaati aan ahayn xubin qoyskaaga ah oo kula nool, ama ugu dir boostada nidaamka risiidhka lagu soo celinayo markuu helo ee boostada caadiga ah.

Haddii aad dib u heli weydo alaabta ka dib markaad waraaqda dirtay, booliiska wac. Haddii aad u dirtid codsi qoraal ah aad ku codsanayso alaabtaada, mulkiiluhu waa in uu soo celiyaa.

-
- ❖ Mulkiilaha wuu diidi karaa in uu kuu soo celiyo alaabtaada ilaa aad ka bixiso kharashkii uu ku raray iyo keydintaba **kaliya** waa haddii mulkiiluhu si sharci ah guriga uga saaray alaabtaada.
-

Waad tagi kartaa maxkamada si aad ugu khasabto mulkiiluhu in uu kuu soo celiyo alaabtaada. Haddii aad ku guuleysato, garsooruhu wuxuu kugu abaalmarin karaa lacag gaadhaysa ilaa \$5,000.

Mulkiiluhu ma iibin karaa alaabtayda?

Kaliya haddii aad dayacday meeshii aad ku noolayd oo aad alabtaadii ka tagtay ama mulkiiluhu kaa saaro guriga ka dib markuu helay xukun maxkamadeed oo uu guriga kaaga saaro oo aadan mulkiilaha qoraal ahaan ku weydiisan in uu kuu kaydiyo alaabtaada. Hadaad diido mulkiiluhu in uu kuu keydiyo alaabtaada, mulkiiluhu wa inuu alaabtaada geeyaa sarta ugu dhow ee dadweynaha ka dhaxeysa.

Haddii qiimaha alaabadaadu ay ka badan tahay \$ 250, mulkiiluhu waa inuu kuugu soo diraa ogeysiis qoraal ah cinwaankaaga ugu dambeeyay ee lagugu oгаа 30 maalmood ka hor intaanu iibin. **Haddii ay ka yar tahay \$ 250**, mulkiiluhu waa in uu diraa ogeysiis qoraal ah toddobo maalmood ka hor intaanu iibin alaabta.

Mulkiiluhu haddii uu alaabta ku iibiyo wax ka badan intii uu kugu lahaa markaa waa in uu hayaa farqi u dhaxeeya muddo hal sano gudahood laga bilaabo taariikhda la iibiyey alaabta. Lacagtaas waad sheegan kartaa waqtigaas.

Mulkiiluhu **kaama** dalban karo in aad bixiso kirada lagugu leeyahay iyadoo taa bedelkeeda lagu soo celinayo alaabtaada. Laakiinse mulkiiluhu markuu iibiyo alaabtaada lacagtaas uu ka helay iibka alaabtaada **wuu ka** jaran karaa kirada ama kharashyada kale ee lagugu leeyahay.

-
- ❖ Haddi alaabtaada qiimaheedu tahay laba boqol iyo konton doolar ama ka yar, mulkiiluhu wuu iibin karaa ama wuu ka takhalusi karaa waxkasta oo aan ka aheyn **waraaqaha shakhsiga ah, sawirada qoyska, iyo waxyaabaha xusuus reebka leh.**
-

Raadso Caawinaad Sharci

- Wixii ka baxsan King County, ka wac khadka tooska ah ee CLEAR Hotline oo ah 1-888-201-1014 maalmaha shaqada inta u dhaxeysa 9:15 subaxnimo - 12:15 duhurnimo.
- King County gudaheeda wac 211 maalmaha shaqada inta u dhaxeysa 8:00 subaxnimo - 6:00 galabnimo. 211 ayaa markay ogaadaan caawimada aad u baahan tahay kuu gudbin doona adeeg bixiye sharciyeed oo munaasib kugu ah.
- Waayeelka (da'doodu tahay 60 jir iyo wixii ka weyn) ayaa ayaguna wici kara CLEAR*Sr taleefankoodu yahay 1-888-387-7111 (gobolka oo dhan).
- Waxa kale oo aad ka codsan kartaa CLEAR*Online: nwjustice.org/get-legal-help.

Daabacaadan waxay ku siinaysaa macluumaad guud oo ku saabsan xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga. Looguma talogalin in lagu beddelo talo sharciyeed oo gaar ah.

© 2020 Northwest Justice Project — 1-888-201-1014.

(Ogolaashaha in la koobiyeeyo iyo qaybinta dokumentigaan waxaa la siiyey Isbahaysiga sinnaanta Caddaaladda (Alliance for Equal Justice) iyo shakhsiyaadka aan ka ganacsaneyn oo keliya.)

_____ [Date/Tariikh]

_____ [name of landlord/magaca mulkiilaha]
_____ [landlord street address/cinwaanka mulkiilaha]
_____ [landlord town/city, state, zip code/magaalada
mulkiilaha/magalada, gobolka, zip kadhka]

Dear/Gacaliye _____ [landlord name/magaca mulkiilaha]:

I am writing about the apartment/house I rent from you at

Qoralkeygu waxuu ku saabsanyahay abartmentiga/guriga aan kaa kiraystay ee
cinwaankiisu yahay:

_____ [address/cinwankaaga].

On or about/Marka ay tariikhdu aheyd ama ku dhoweed _____ [date you
were locked out/maalnta lagaa xiratay], you and your agents excluded me from the
rental by/adiga iyo wakiilkaaga ayaa sidan iiga saarteen guriga aan kireystay:

- locking me out and/or Waad iga xiratay ama/iyo
- calling the Sheriff to have me removed and/or Waxaad u wacday Booliiska in
guriga la iga saaro iyo/ama
- other/Wax kale:

You have no court order or Writ of Restitution permitting these actions.

The Residential Landlord-Tenant act, Ch. 59.18 RCW, and the unlawful detainer statute,
Ch. 59.12 RCW make self-help evictions illegal. Your conduct violates the law.

Ma heysatid amar maxkamadeed ama xukun maxkamadeed oo guriga iga saaraya oo
oggolaanaya ficiladaas.

Xeerka Qeexaya Masuuliyada iyo Xaquuqda Saaran Milkiilaha iyo Kiraystaha (The
Residential Landlord-Tenant act), Ch. 59.18 RCW, iyo guri ka saarista sida sharciyaysan
xukun maxkamadeed loo maro (unlawful detainer statute), Ch. 59.12 RCW waxay
dhigayaan inay sharci daro tahay inaad iskaa guri ka saarida samayid. Dhaqankaagu
wuxuu yahay mid sharciga jabinaya.

Please note /Fadlan ogow:

- I have not abandoned the place/Ma aanan dayacin goobta aan deganaa.





I have no intention of abandoning the place/Ma lahi ujeeddo ah in aan dayaco goobta aan deganaa.

I have been denied access to my residence since/Waa la ii diiday in aan galo gurigeyga ilaa _____ [date/tariikhda].

I am worried that you have allowed unauthorized people to enter the place and remove my things. I will consider you responsible for any loss or damage to my property that occurs before you return it. Please consider this letter a demand upon you to restore immediate possession of the residence to me.

Waxaan ka walwalsanahay in aad u oggolaatay dad aan sharci u laheyn inay soo galaan guriga oo aad ka saartay alaabtaydii. Adiga ayaan ku saaray masuuliyada wixii khasaaro ah ama ku dhaca alaabtayda inta aadan ii soo celin. Fadlan u tixgeli warqaddan in ay tahay dalab adiga kugu saabsan oo ah in aad si dhakhso leh iigu soo celiso guriga.

Please call at once at/Fadlan isoo wac hal mar _____ [your phone number/lambarka taleefankaaga] so we can work out how you will get the new key to me/si aan uga wada shaqeyn karno sida aan kaaga heli karo furaha cusub.

If you do not give me immediate access to the apartment/house, I will seek assistance from the County Sheriff and/or the Superior Court to get back possession of the apartment/house.

Haddii aadan isla markiiba ii ogolaan in aan galo abartmentiga/guriga, waxaan caawimo warsan donaa Booliiska Degmada iyo/ama Maxkamadda Sare si aan dib ugu soo ceshado abartmentiga/guriga.

Thank you for your cooperation.

Waad ku mahadsan tahay iskaashigaaga.

Sincerely/Nabedgelyo,

